# Nadiifinta aagga hoose ee guriga (basement) ka dib daad

Aagga hoose ee guryaha ee biyaha sagxadda dhulku soo galeen, biyo kaga soo maaxeen derbiyada, ama ay soo galeen biyaha bulaacadaha oo dib ugu soo noqday badanaa khasaaraha dhisme ahaan ee soo gaadha wuu yar yahay ama waxba ma noqdaan dhisme ahaan, sababta oo ah biyaha gudaha ayaa derbiyada ka caabiya cadaadiska biyaha dibadda ama cadaadiska carrada biyuhu fadhiyaan.

### Sidee iyo goorma ayaan biyaha dibadda u bamgareeyaa?

Raac fariimaha soo socda si aad u saartid biyaha:

- Ha saarin biyaha ku jira gudaha aagga hoose ee guriga ilaa badi biyaha dibadda derbiyada ay hoos u degeen. Tani waxay derbiyada ka ilaalin doontaa in gudaha loo soo riixo ama in sagxadaha guriga dhaqaaqaan.
- Haddii biyo badani ku jiraan aagga hoose ee gurigaaga ama aanuu jirin meel loogu talogalay biyo ka saarista aagga hoose (basement drain), waxa aad u baahan tahay inaad soo iibsatid ama soo kiraysatid bambo biyo saaris (sump pump) si aad u saartid biyaha.
- Haddii sanduuqaaga korontadu (electrical panel) ku yaalo aag ah gurigaa oo biyuhu ku soo fataheen, ma awoodi doontid inaad isticmaashid bambo biyo saaris oo koronto ku shaqeysa adiga oo isticmaala bambo ku shaqeynaysa baytari 12-volt ah oo otomaatig ah mooyaane. Waxa la isticmaali karaa bambo ku shaqeynaysa baatrool ama baansiin (gasoline engine pump) haddii dhuunteeda qiiq saarista dibadda la gaadhsiin karo.
- Bilaw inaad biyaha ka bamgareysid aagga hoose ee gurigaaga haddii biyaha guduhu ay ka heer sareeyaan biyaha daadka ee dibadda. Waxa aad u baahan doontaa cabirid si aad tan u ogaatid.
- Jooji bamgareynta marka heerka labada biyo isku mid noqdo.
- Biyaha aagga hoose ee guriga ku bamgaree cabir ama xawaare la mid ah ka biyaha daadku ku tagayaan ama ku sii yaraanayaan.

### Sidee baan u nadiifiyaa aagga hoose ee guriga?

- Majarafad/badiil ku qaad dhoobada ku jirta aagga hoose ee guriga isla marka biyuhu ka gororeen ama laga bamgareeyay si sagxadaha iyo derbiyadu u qallalaan.
- Baraha ay dhoobada ku sameysay derbiyada iyo wasakhda tirtir adiga oo tuubo cadaadis sare leh ku biyo-raacinaya derbiyada shubka ah iyo aasaaska dhagaxa ah.
- Haddii baruhu ku hadhaan derbiyada, ku xoq burush tin adag iyo saabuunta budada ah ee dhigista. Ka bilaw xagga sare oo u soco xagga hoose. Marrar badan raaci biyo cad.
- Sida ugu dhakhsaha badan ee suurtogal ah u bilaw engejinta aagga hoose ee guriga si loo yareeyo bollolka looxa ama korista caaryada ama fangaska.
- Fur dhammaan albaabada iyo daaqadaha si suyuca loogu oggolaado inuu u baxo dibadda.
- Iibso ama kirayso marawaxad ama suyuc-saare (dehumidifier) si loo dedejiyo shaqada engejinta.
- Haddii aad xasaasiyad ama alerji u leedahay caaryada ama fangaska, xidho waji-qaris/maaskalo ama qalabka lagu neefsado oo leh shaandho haboon.

### Sidee baan iskaga ilaalin karaa halista shoog?

- Taxadir samee ka hor inta aanad isticmaalin qalab koronto ku shaqeeya oo yaala guri uu daad soo galay.
- Marna ha daarin qalab koronto ku shaqeeya oo qoyan sababta oo ah waxa laga yaabaa in taasi keento shoog koronto, kulayl-dhaafid, ama bilawdo dab.

### Sidee baan uga takhalusi karaa urta?

- Haddii hawo saariddu aanay saarin urta:
  - Dhulka iyo derbiyada sabada ah ku masax milan/hoore biliij ah (3/4 koob oo ah biliijka guriga oo lagu daray hal gallaan oo biyo ah).
  - Biyo raaci oo engeji ka dib 5 daqiiqadood.
  - Fur daaqadaha marka aad maranaysid milanka biliijka.
- Kuus ah dhuxul qallalan ku rid weel bir/macdan ah si ay nuugto urta.

Washington State Department of Health
Wasaaradda Caafimaadka ee Gobolka Washington

PO Box 47890
Olympia, WA 98504-7890

Bogga Internetka:
**www.doh.wa.gov**

360-236-4027
(800) 525-0127

DOH Pub 821-049
Somali